



BUFFALO PUBLIC SCHOOLS

Office of the Superintendent

65 Niagara Square Room #712 City Hall

Buffalo, New York 14202

Phone (716) 816-3575

Fax (716) 851-3033

TMWilliams@buffaloschools.org

Dr. Tonja M. Williams
Interim Superintendent of Schools

Meey 26, 2022

Bulshada sharafta leh ee Dugsiyada Dadweynaha Buffalo,

Badbaadada ardaydeena, macalimiinteena, shaqaalaheena, iyo qoysaskeena ayaa ah mudnaanteena ugu muhiimsan. Waxaan qaadeynaa tallaabo kasta si aan u ilaalino badbaadada bulshadeena

Waxaan rabnaa inaad ogaato inaan maqalnay welwelkaaga qotada dheer ee ku saabsan badbaadada dugsiyadeena. Waxaan qiimeynay dhibco badan oo xog ah, waxaan ognahay baahida loo qabo kordhinta tillaabooyinka amniga dhismayaasheena. Waxaa jira ilo badan oo cabsi iyo walaac ka jira bulshadeena. Korodhka heerarka caabuqa COVID-19, Jaahwareerka dhaq-dhaqaaqa baraha bulshada ee naxdinta leh, dil wadareedka naxdinta leh ee ku salaysan isir naceybka ee dhawaan ka dhacay Waddada Jefferson iyo dil aan wax lagu macneeyo lahayn oo loo geestay 19 carruur ah iyo laba macalin, kuwaas oo lagu dilay toogasho dugsi oo ka dhacday dugsi hoose ee Uvalde, Texas. Shaki la'aan, dhacdooyinkan oo dhami waxay walaac ku abuurayaan dugsiyadeena. Sidaa awgeed, waxaan xaddideynaa gelitaanka dhammaan dhismayaasha degmada.

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad ku qabato dhammaan shirarkaaga qaab onlayan ah sida Zoom, Webex ama Teams beddelka ka qayb qaadashada kulamada shaqsi ahaanta gudaha dhismaha dugsi. Haddii codsigaaga kulanka dugsi dhexdiisa la oggolaado, fadlan ogow waxaa laga yaabaa in lagaga baahdo inaad mar toonaan habka usha-baaritaanka jirka iyo/ama hab-raac baaritaan la mid ah kan ardaydeennu la kulmaan markay soo galaan dugsiyadeena.

Fadlan ogow in dhammaan xafladaha dhammaadka-sanadku ay u bilaaban doonaan sidii caadiga ahayd iyadoo la raacayo tallaabooyin ammaan oo dheeraad ah.

Salaan Wacan,

Dr. Tonja M. Williams,
Kormeeraha Guud ee Ku-meelgaarka ah ee Dugsiyada